



## UJEEEDO: CADDEYN QIRAAL MARKHAATI

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay 19/12/2024, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa ii yimid **Abdiqani Ahmed Farah** oo hoos ku xusan oo I weydiistay in aan ka qoro caddeyn, waana sidaan soo socota:-

**Magaca:** Magacaygu waa **Abdiqani Ahmed Farah Taariikhda Dhalashada:** Waxaan ku dhashay 22 Feb 1990, **Cinwaanka Hadda:** Waxaan hadda ku noolahay **Gobolka Shabeelada Hoose deegaanka Ceelasha Biyaha.**

Aniga oo ah **Abdiqani Ahmed Farah sita passport Lr:P01309270**, waxaan ku cadeynayaa in aan leeyahay aqoon shaqsiyeed oo ku saabsan dhibaataada iyo xaaladaha murugada leh ee ay soo martay **Bilan Xirsi Salad** Waxaan saaxiib la'ahay oo waxaan si dhow ula socday dhibaatooyinkeeda, gaar ahaan guurkii khasabka ahaa ee lagu guursiiyay **Said Mohamed** sanadkii 2013.

Guurkaas wuxuu ahaa mid khasab ah oo aan ku imaan raali ahaansho, waxaan ogaa in qoyskii ay la noolayd ay lacag ka qaateen Said si ay ugu guuriyaan, Xiriirka guurkaas wuxuu ahaa mid ay la kulantay jirdil, galmo khasab ah, hanjabaad joogto ah, iyo dhaawac jireed, Waxaa ka mid ahaa dhacdooyinka xanuunka badan markii Said uu ku shubay biyo kulul oo dhaawacyo daran ka gaaray caloosha.

Intaa waxaa dheer, markii Bilan ay ka baxsatay Said oo ay u carartay Kenya, waa uu u hanjabayay oo cabsi iyo walbahaar ayuu ku abuuray, taasoo caddeyn u ah in ay khatar weyn ugu jirto haddii ay ku noqoto Soomaaliya ama gobolkii hore ee ay ka soo carartay.

Waxaa muhiim ah in codsigeeda magangalyada la tixgeliyo, maadaama nolosheeda ay khatar ku jirto haddii loo celiyo Soomaaliya.

### SAXIIXA CADEEYAHA

Abdiqani Ahmed Farah

ABDI QANI



Ref.1286/T.P.N/2024

NOOTAAYAHA (Notary Certification)

Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, waxaan cadeynayaa in saxiixa sare ku xusan uu yahay kii runta ahaa ee cadeeyaha sare ku xusan wuu saxiixay isagoo dhinac kasta ka caafimaad qaba oo raalli ah waxaana lagu keediyey diiwaanka guud ee nootaayada.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 19/12/2024

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Bashiir Xirsi Salaad** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **Bilan Xirsi Salad** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1286/T.P.N/24, Tr. 19/12/2024**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Loo Caddeeyaha</b>	Bilan Xirsi Salad
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	19/12/2024

**Wakiilka Loo Caddeeye:** Aniga oo ah **Bashiir Xirsi Salaad**, Leh Tel No. **0615357737**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Bilan Xirsi Salad**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed**

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

**Bashiir Xirsi Salaad**